

Ka Hortag & Wacyi-gelin

Ku wacyi-gelinta ka hortagga dambiyada iyo akhbaarta ku saabsan nidaamka cadaaladda waa qayb muhiim ah oo ka mid ah hawlaha Xafiiska Xeer-Ilaaliyaha Degmadda Anoka (Anoka County Attorney's Office).

Waxa aan heegan u nahay inaan siino wacyi-gelin iyo xiriirin ku saabsan mawduucyo badan beesha Degmadda Anoka oo ay ku jiraan:

- Xaquuqda Dhibanayaasha Dambiyada laga galo
- Fara-xumeyn Xoogid ah
- Gacan-qaadka Qoyska ka Dhex Dhaca
- Ku Tacadiga Waayeelka & Ku Takri-falka Dhaqaalaha
- Xatooyada Magacyada & Khatalaadaha
- Amaanka khadka (Online)
- Isticmaalka Maandooriyeyaasha (Opioid) & Docaha kale ee Mukhaadaraadka
- Maxkamadaha Gaar ah

Codsiga qof u hadla dhibanaha

Hadii aad jeclaan lahayd inaad codsato inuu bandhig ku siiyo Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Degmadda Anoka (Anoka County Attorney's Office), soo wac Xiriiriyaha Xiriirka Bulshada ee khadkiisu yahay 763-324-5471 ama ugu dir emayl ciwaanka ah attorney@co.anoka.mn.us.

Nagala soo Xiriir

Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Degmadda Anoka (Anoka County Attorney's Office)

763-324-5550

attorney@co.anoka.mn.us

anokacounty.us/attorney

Adeegyada Dhibanaha/Makhraatiga

763-324-5540

Saacadaha 8 da subaxnimo ilaa iyo 4:30
galabnimo, Isniin ilaa Jimce

victimwitness@co.anoka.mn.us

anokacounty.us/victimwitness


Noo sheeg hawsha aan qabanayo

anokacounty.us/vwfeedback



QAYBTA ADEEGYADA DHIBANAHA/ MAKHRAATIGA

*Habraac uu fidinayo
Xafiiska Xeer Ilaaliyaha
Degmadda Anoka
(Anoka County Attorney's Office)*



Qasdiga

Dhibanayaasha iyo Makhraatiyadu waxa ay ka ciyaaraan door muhiim ah nidaamka cadaalada. La shaqeynta ay la shaqeeyaan hay'ada ilaalinta sharcigu waxa ay lama huraan u tahay la xisaabtan lagula xisaabatamayo dambiilayaasha dambiyada ay geystaan.

Hadafka qaybta Adeegyada Dhibaha/Makhraatigu waa inay siiso dhibanayaasha iyo makhraatiyada adeegyo gargaar iyo kaalmo ah si ay u wajahaan dambiga laga galay laftiisa ayna u fahmaan doorkooda nidaamka cadaaladda.

Qasdigyagu waa inaan dhowrno xaquuqda iyo maslaxada makhraatiyada iyo dhibanayaasha dambiyada anagoo haddana dhiiri galinayo ka qaybqaadashada habka maxkamadda iyo wax ka qabadka baahida gaarka u ah ee ay keentay dhib geysigu.



Adeegyada

Muxuu qabtaa qofka qaabilsan gargaarida Dhibanaha/Makhraatiga?

- Waxa uu ka caawiyaa dhibanayaasha dambiyada laga galay inay fahmaan xaquuqdooda iyo hanaanka uu u shaqeeyo nidaamka cadaaladdu
- Waxa uu hubiyaa xaquuqda sharciga qoran ee dhibanaha in la oofiyo
- Waxa uu dhisaa is-aamin iyo is-faham si uu uga gargaaro dhibanayaashu inay xoojiyaan awoodooda iyo go'aan gaaridooda
- Waxa uu siiyaa akhbaar joogta ah oo ku saabsan meesha dacwadu marayso
- Waxa uu u soo raaca dhibanaha maxkamada wuxuuna kala qayb galayaa dhagaysiga dacwadaha
- Waxa uu ku dhiiri geliyaa dhibanayaashu inay ka qayb galaan habraaca maxkamadaynta
- Waxa uu kala shaqeeyaa xeer ilaaliyaha dowladda in la sugo in ra'yiga dhibanaha la tix-geliyo kolka dacwadda dambiga ahi ay socoto
- Ka dhex akhriyo maxkamada oraahda ka hadlaysa dhibka gaaray dhibanaha hadii uu dhibanahu ka codsado
- Uu u dhaxeeyo dhibanaha iyo hay'ada kale ee nidaamka cadaaladda sida hay'ada sharci ilaalinta iyo xabsiyada
- Uu u diyaariyo dhibanaha iyo makhraatiyaasha inay maxkamada makhraati ka furaan
- Inuu u fidiyo gargaar dhaqaale, oo ay ku jiraan qaamaha, magdhowyada, degdeg dhaqaale u siin, iyo siin lacagaha la siiyo dhibanayaasha fara-xumeynta xoogida ah loo geysto
- Waxa uu u gudbiyaa adeegyo quman

Xaquuqda & Baahida Dhibanaha

Xaquuqda Dhibanaha

Qodobka Sharciga ah ee Minnesota ee 611A (Minnesota Statute 611A) ayaa waxa uu siiyaa dhibanayaasha dambiyada laga galay xaquuqahan soo socda:

- Xaquuqda Ogaysiinta
- Xaquuqda ka qaybqaadadka maxkamadeynta
- Xaquuqda ka dhowrida waxyeelo
- Xaquuqda codsiga gargaar dhaqaale
- Xaquuqaha kale ee dheeraadka ah ee loo hibeeyo dhibanayaasha gacan qaadka loogu geysto qoyska dhexdiisa, kuwa fara-xumeynta xoogida ah iyo khashkhashaada loo geysto

Cadaalad soo celinta

Wada hadalka dambiilaha iyo dhibanaha:

Dhexdhexaadiye tababaran ayaa qabanqaabiye wada hadal dhexmara dhibanaha iyo dambiilaha isagoo adeegsanaya hanaano dhexdhexaadnimo ah, qarsoodi iyo dhibaato xalin ah iyadoo lagu sugan yahay goob amaan ah si la isugu dayo in laga bogsoodo waxyeeladdii uu dambiga la geystay uu keenay.

Shirarka Kooxaha:

Xubno qoyska iyo beesha ka tirsan ayaa kulma si ay u go'aansadaan sida loogala xisaabtamayo dambiilaha waxa uu geystay iyo sidii uu u qaadi lahaa mas'uuliyada hagaajinta waxyeeladii uu geystay.